Injirta madaxa – dhibaato sii kordheysa

Dhibaatada injirta madaxu way sii korodhtay ilaa iyo 1990-yadii. Maanta, carruurta yar-yar ee u dhexeeya da'da 3 iyo 11 ayey ku dhacdaa. Dhibaatada ugu weyn ee injirta waxaa badanaa la ogaadaa marka uu xilliga iskuullada iyo xannaanooyinku billowdo. Injirtu waxay si aad ugu kobocdaa kugta madaxa. Ma boodi karto mana duuli karto. Markaas isu soo dhowaansho ayaa loo baahdaa, timaha oo timaha lagu taabto si markaas ay injirtu ugu xamaraato oo ugu gudubto una gasho qoflka kale. Maadaama carruurta iyo dadka waaweyn badankoodu ay maanta leeyihiin meelo badan oo ay ku kulmaan iskuna gaaraan, halista faafintu way korodhtay. Injirta madaxu waa dhibaato sii kordheysa, oo aan ku koobneyn carruurta oo keliya ee laakiin gaartay qoysaska oo dhan, maadaama ay injirtu si fudud ugu faafto xubnaha qoysaska oo dhan ka hor inta aan dhibaatada la ogaan oo aan la daaweyn.

Maxay tahay sababta aan u isticmaalayo NitFree?

Inta badan badeecooyinka suuqa yaalla maanta waxaa aasaas ahaan loogu talogalay la dagaallanka injirta, laakiin mar walba si isku mid ah wax ku ool uguma ahan wax ka qabashada ugxanta (ukunta). Tan macnaheedu wuxuu yahay in daaweyno fara badan ay ku jirto marxalado daaweyn oo kala duwan oo ay tahay in waqti dheer la maro. Isticmaalidda NitFree, taasoo ay isla mar la wada socdaan ukunta iyo injirta labaduba, waxay kala jebisaa meertada nolosha injirta. Ukuntu fursad uma heleyso ay ku dillaacdo, taasoo macnaheedu yahay in aysan injirtu tarmi karin. Muddada daaweynta markaa si la taaban karo ayaa la soo gaabin karaa.

Wakaaladda Daawadu waxay culeyska saaraysaa muhimmadda ku shanleysashada shanlo ilko yar-yarThe si loo daaweeyo injirta. Daraasad British ah oo lagu daabacay Jariiradda Daawada ee British-ka ayaa muujisay in shanelyntu ay noqon karto mid afar goor ka wax ku oolsan isticmaalidda daawada injirta ee la iska soo iibsado.
Waxa NitFree ka soocaya shanlooyinka kale waa ilkaha ka soo taagan ee aadka u yar-yar ee lagu sameeyey taasoo macnaheedu yahay in ukunta iyo injirta labadaba ay shanladu wada saarayso isla waqti. Isticmaalidda shanladii injirta ee caadiga ahayd, badanaa way ku adag tahay in ukunta looga soo fujiyo timaha ay kula dheggan tahay dheecaanka sida koollada oo kale. Masaafada u dhexeysa ilkaha shanlada NitFree waxay ka yar tahay 0.2 mm, taasoo macnaheedu yahay in xataa injirta iyo ukunta ugu yar ay shanladu soo saarayso.

NitFree waxaa laga sameeyey bir aan miririn. Waqti dheer ayey jirtaa dhammaashadana way u adkaysataa, waxaana loo isticmaali karaa kiimikada lagu daaweynayo injirta iyadoo aysan wax dhibaato ah ka gaarin. Qaabka iyo muuqaalka labaduba isma beddelaan si kasta oo loo isticmaalo, maxaa yeelay NitFree waxaa lagu qaabeeyey jaan go'naan iyadoo la isticmaalayo farsamada laysarka. Shanlada waa la jeermi tiri karaa waxaana isticmaali kara dhammaan xubnaha qoyska oo dhan iyadoo aan wax halis kale ah uga imaaneyn faafid injir.

Waxaa sii dheer in dhowaan, ay soo baxeen warbixinno ah in isticmaalka kiimikooyinku ay keentay noocyo injir ah oo daawada u adkaysta. Ku shanlaysashada NitFree ma sii kordhineyso arrintaas.

Fikradaha gaarka ku ah NitFree

Way waqti dheer tahay jeermi la'aanna waa la dhigi karaa
Waxaa laga sameeyey bir aan miririn, qaabka iyo muuqaalka labaduba isma beddelaan.

Gano caag ah oo ku fiican qabsashada
Shanladu kaama fara baxsanayso, xataa haddii gacmahaagu ay qoyan yihiin ama saabbuun leeyihiin.

Ilko shanlo oo dhaadheer
Si wanaagsan loo gaaro. Injir iyo ukun badan ayaa shanladaan dibedda loogu saari karaa halkii mar ee lagu jiidaba.

Masaafo isu dhow u dhexeysa ilkaha shanlada
Xataa ukunta iyo injirta ugu yar dibedda ayey u soo saartaa.

Kurtummo aad u yar-yar oo u gaar ah
Ukunta way ka fujisaa tinta iyadoo isla markaana dhaawacaysa. Qaabka jaanta go'an ee kurtummada yar-yar iyo afafka galoolan macnahoodu waa in timaha iyo kugta midkoodna aan wax loo geysan marka la shanlaynayo.



Macaamiisha isticmaasha NitFree

"*Waxaan hadda lurka la dirireynay bilo – rajo la'aan ah... Markaan anigu (iibiye iyo suuq geeye ahaan) akhriyey ammaanta, waxay ila noqotay "hagaag, waan arki doonnaa! Ammaan maxay ah...". Waxaan ka sheekeyn karaa waxaan anigu kala kulmay: wax ayey tartaa! Waan shanleynay oo shanleynay oo shanleynay! Waxaan hadda meesha ka saarnay ukuntii aan horey u raadin jirnay aanna ku soo qaban jirnay biinsooyinka. Hal shanlo marin oo keliya. Haddii aad fadhiisato oo aad tan u akhriso sidii qof aan shanlada haysan, fartiintayda ugu diirran waa inaad soo gadataa."*

Sofie, hooyada labo carruur ah oo "timo cufan "

"Halo, waxaan rabaa oo keliya inaan warqad idiin soo qoro oo idinkaga mahad celiyo shanladiinna cajiibka ah! Labo toddobaad ka dib markaan isticmaalay shanladiinna, injirtii way naga wada baxday. Xoogaa waan ka shakisanaa markii ugu horreysay in shanladu ay wax ka qaban doonto timo afro ah iyo in kale, laakiin si fiican ayey wax uga qabatay. Waxayba ila tahay in Nitfree ay isticmaalka uga fiican tahay shanlada timaha kala furfurta ee aan isticmaali jirnay."

Tanja, hooyada labo carruur ah oo - oo dhammaantood timo afro ah leh

"Waxay injirtii nooga baxday muddo 3 maalmood ah waxaanna joojinnay isticmaalka daawadii injirta. Aad ayaan ugu faraxsannahay shanlada. Mar walba way wanaagsan tahay in xal loo helo dhibaatada guriga ka jirta."

Per, aabbaha saddex carruur ah

Tani waa sida aad u isticmaaleyso NitFree

NitFree ku isticmaal musqusha si markaas aad si fudud shanlada biyo scoda ugu raacisid marka kasta oo aad timaha shanlada mariso.

1. timaha engeji, ama xoogaa qoo si hoos loogu dhigo koronto joogto ah

2. Isticmaal shanlo caadi ah ama buraash si aad timaha ugu shanleysid oo wixii isku guntan aad ugu kala saartid.

3. Timaha qaybo yar-yar u kala qaybi isla markaana si taxaddar leh NitFree ugu jiid qayb kasta. Fiiri wixii ka soo baxa mar kasta oo aad shanlada mariso. Si fiican ayaad u arkaysaa haddii aad shanlada ku dul ruxdo warqad cad ama muraayad. Waa muhiim in kugta sida ugu suuragalsan shanlada loo mariyo si ukumaha loo helo. Qaybaha aad shanlaysay waa in si gaar ah looga hayaa qaybaha aan weli la shanleyn.

4. Shanlada nadiifi mar kasta oo aad timaha mariso. Haddii aad si taxaddar leh u kala saartid ilkaha shanlada marka aad shanlada u dhigto biyaha socda, injirta iyo ugxanta oo dhan way baaba'yaan.

5. Jeermiska ka dil shanlada NitFree markaad dhammeyso shanlaysiga adiga oo 1 daqiiqo shanlada ku karkarinaya biyo karkaraya. Ha illoobin inaad nadiifiso dhammaan shanlooyinka ama buraashyada kale ee aad isticmaashay.

Qaabka kore maalin kasta ku soo celi ilaa ay dhammaan injirta iyo ugxantu kaa baxaan. Markaad daaweynta dhammeyso, waxaan ku faraynaa inaad sii waddo inaad si joogto ah NitFree ugu shanleysato si aad waqti hore u ogaatid dhibaatada iyo si aad isaga ilaaliso injirta oo mar kale kugu faafta.

Ha illoobin inaad hubiso in xubnaha kale ee qoyska ay gashay iyo in kale marka aad qof qoyska ka tirsan ka daaweyso si markaas qof kasta isku waqti loo daaweeyo.

www.LusFri.nu

NitFree waxaa lagu iibiyaa dukaammada caafimaadka ee sida wanaagsan u cammiran www.LouseFri.nu.

Si aad u hehsid war dheeraad ah iyo siyaabaha loo isticmaalo oo luqado kala duwan ku qoran, , booqo: www.LouseFri.nu or email: info@lousefri.nu.

Waxaa Waddammada Nordic u suuq geeya:

LusFri
Tutviksvägen 15
136 75 Haninge
Sweden
Telefoon: +46 (0)73 - 503 3436

www.LusFri.nu

INJIRTA MADAXA?

Noqo 'LusFri.nu'

Iska koontarool – injirta si *dhakhsa ah* u baabi' adigoo ka billaabaya ugxanta.

NitFree – shanlo injireed leh kurtimmo aad u yar-yar oo u gaar ah oo isku mar meesha ka wada saarta ugxanta iyo injirta.

Qiimo ku wanaagsan lacag ahaan mana dhammaato. Waxaa sidoo kale la farayaa iney isticmaalaan dadka xajiinta qaba.